

90

DHAQAN IYO DEGAAN

FASALKA KOWAAD

I

TILMAAME BARE

Wasaaradd Waxbarashda Iyo Barbaarinta
Xafiiska Manashijta

DHAQAN IYO DEGAAN

FASALKA KOWAAD

1

**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA**

**Buggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan
Wassaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin
ogolaansho**

DAAABACAADDII LABAAD

**Waxaa lagu daabacay
Madbacadda Qaranka
XAMAR, 1976**

H O R D H A C

Casharada dhaqanka iyo degaanka ee fasalka kowaad ee Dugsiyada Hoose.

Waxa jirta in ardayga fasalka kowaad ee Dugsiyada Hoose aanu waxna akhriyi karin, waxna qori karin. Sidaa awgeed, ardayga fasalka kowaad ku jira looma qorin buug-arday, waxase loo qoray tilmaame bare uu macallinka fasalkaas dhigayaa maaddadaa isticmaalo.

Casharada dhaqanka iyo degaanku waxay ka kooban yihiin Juqraafi iyo Taariikh. Duruusta dhaqanka iyo degaanku ee fasalka kowaad badi-deedu waxay ku saabsan tahay waxyaallo ardaygu arki karo ama taaban karo. Waxyaallahaasu waxa weeye kuwo uu ardaygu noloshiisa caadiga ah maalin walba kula kulmo.

Cashar kasta oo casharada dhaqanka iyo degaanka ka mid ihi waxa uu ka koobmaa qaybaha soo socda:

- 1. Ujeeddada casharka laga leeyahay.*
- 2. Bare kalkaale oo ah qalabka macallinka gargaaraya si uu casharka ardayga uga dhaadhiciyo.*
- 3. Dulucda casharka oo ah macluumaadka la doonayo inuu macallinku ardayga u gudbiyo.*
- 4. Tusaale Bare oo ah tilmaamo iyo talooyin macallinka la sii-naayo si uu casharka ugu guuleysto.*
- 5. Hawlaha ardayga oo ah shaqo ardayda la doonaayo in ay qabtaan iyada oo macallinku hoggaaminayo.*
- 6. Laylis oo ah su'aalo ardayga la rabo inuu ka jawaabo si macallinku u qiyaaso in ardaydu fahamtay casharkii iyo in kale.*

Su'aalaha iyo hawlaha ardaydu kuma dhamma inta tilmaamaha baraha ku taal oo qudha ee macallinka waxa la farayaa in uu ku daro ama ku kordhiyo wixii uu is yiraahdo way ka dhiman yihiin.

Macallinka waxa la farayaa inuu casharada dhaqanka iyo degaanka la kaashado dadka aqoonta u leh waxyaallaha duruustu ku saabsan tahay. Dadkaas oo ah kuwa tuullada, magaalada iyo degmada uu joogo ku nool ee uu heli karo.

Xafiiska manaahijta ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarintu

wuxuu u mahadnaqayaa Jaalle:

1. *Maxamed Maxfuud Axmed*
2. *Aadan Xaaji Nuur*
3. *Axmed Maxamed Qaadi*
4. *Muuse Xasan*
5. *Yuusuf Ismaaciil Khalaf*

oo buugga qoray, Cumar Geelle Maxamed oo sawirrada u sameeyey iyo kooxdii buugga garaacday.

Bashiir Faarax Kaahiye

Maamulaha Xafiiska Manaahijta W.W.B.

TAARIKH

QAYBTA

KOWAAD

Casharka Kowaad

Q A D H A A B S I

1) Ujeeddo:

Ujeeddada labada cashar ee soo socdaa waa in ardaygu ogaado; in dadkii hore soo maray nolol ka dhib badan tan maanta joogta. Dhibaatooyinkii noloshii hore waxa ka mid ahaa:

- 1) Iyada oo ugaartu mararka qaarkood qofka ka gacan sarrayn jirtay oo isaga naftiisa la ugaarsan jirey.
- 2) In dadku mararka qaarkood qadi jirey oo waxba waayi jirey. Taas oo ku dhici jirtey ugaarta oo fakata ama miraha oo yaraada.



Qof geed hoostii miro ka urursanaya.

2) **Dulucda Casharka:**

Dadkii hore waxay ku noolaan jireen qadhaab, qadhaab-kaas oo laba qaybood u kala bixi jirey:

- 1) Miro dhirta ka daata, sida yicibta, gobka, madheedh-ka, hohobta, dhaameelka, iyo wixii la mid ah.
- 2) Xididdo ama bari la cuno oo ay qodan jireen, sida: likaha, cillalka, doombirta, moxogga, iyo wixii la mid ah.

Markii dambe dadku wuxuu bartay dhirta koristeeda iyo lulisteeda si ay miro badan u helaan.



Qof geed guudkii miro ka guranaya.

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu inta uu qadhaab heli karo ha tuso ardayda. Sida: yicibta, hohob, moxog, xabag, iyo wixii la mid ah.
- 2) Baruhu ardayda ereyada soo socda ha u macneeyo: qadhaabsi, lulis, doombir, like, cillal iyo wixii kale uu arko inay adag yihiin.
- 3) Baruhu waa inuu casharka degaanka la kaashadaa, oo wixii ku adkaada dadka weydiiyaa. Sida magacyada miraha iyo ugaarta.

4) Hawlaha Aardayda:

Ardaydu ha soo ururiso wixii qadhaab ay heli karaan arday walibana fasalka ha uga sheekeeyo wixii uu soo helo ama qadhaabka ka yaqaan.

5) Laylis:

- 1) Waa maxay qadhaabsigu?
- 2) Sheeg siddeed geed oo miro la cuno leh?
- 3) Sheeg saddex geed oo xididdadooda la cuno ama la calaashado?

U G A A R S I

1) Ujeeddo:

Ujeeddada casharkan laga leeyahay waxay la mid tahay ta casharka Kowaad oo ah qadhaabsi horena loo soo sheegay.



Dad biciid ugaarsanaya

2) Dulucda Casharka:

Dadkii hore way ugaarsan jireen. Qalabka ay ku ugaarsan jireenna wuxuu ahaa dhagax iyo burar ay dhirta ka goostaan. Ugaarsigu wuu dhibaato badnaa, waayo ugaarta badankeedu way ka orod badneed dadka, qaarkeedna way ka xoog weyneyd. Maalmaha qaarkood waxa dhici jirtey inuu ugaarsanyi jirey oo uu soo hungoobi jirey. Dadka xeebaha ama webiyada ku ag nooli waa degganaayeen, kalluunkana way jillaaban jireen.



Nin kalluun jillaabanaaya.

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyada ay ka mid yihiin: ugaarta, jillaabasho, hungow, iyo kuwa kale ee uu arko inay ardayda ku adag yihiin.
- 2) Baruhu waa inuu ardayda u sharxaa hababka kala duwan ee wax loo ugaarsan jirey sida:
 - b) Dhagax iyo budh wax lagu dilo.
 - t) Dabin la dhigo ama la xiro.
 - j) Booran qarsoon oo ugaarta lagu didiyo.
 - x) Gabraarasho.
 - kh) Jillaabasho (Kalluun).
- 3) Baruhu ha sameeyo liisto ah ugaarta degmada iyo gobolka ardaydana ha baro, fasalkana ha ugu dhejo.
- 4) Baruhu ardayda ha fahamsiiyo in ugaartu ka mid tahay khayraadka dalka waajibna ay tahay in la nabad geliyo aan lana dilin.

5) Faa'iidooyinka ugaartu u leedahay dadka wax ha uga sheego sida: hilibkeeda oo la cuno, saanteeda oo kabo iyo suuman laga sameysto. Dalxiiska ka yimaada dhulka shisheeyaha ayaa u daawasho yimaada, ugaarteen u lacag bay dalka soo gelisaa.

4) Hawlaha Ardayda:

- 1) Waxaad soo qabataa ballanbaalis ama shimbir.
- 2) Fasalka uga warran sidaad u qabatay.

5) Laylis:

- 1) Waa maxay ugaarsigu?
- 2) Sheeg laba hab oo loo ugaarsado?
- 3) Sheeg afar ugaarta degmada ku nool ah?
- 4) Haddii ugaarta la dabargooyo maxaa dhacaya?

Casharka Saddexaad

BILAWGII GUURISTA

Ujeeddada casharkani waa in ardaydu ogaato in no-
losha salkeedu yahay cuntada oo lagama maarmaan ah. Sidaa
daraadeedna dad kii hore waxa ay u guuri jireen ama u hayaa-
mi jireen meesha ay quudkooda ka helayaan.



Xaas geedi ah iyo ugaar baxsahaysa.

2) **Dulucda Casharka:**

Dadkii hore waxay ogaadeen in xayawaankii ay ugaar-
san jireen ka tegeyo meesha dadku joogo, miraha qudhooduna
ka yaraanayaan halka la yaal.

Sida darteed, waxa qasab ku noqon jirey inay guuraan,
waxayna u guuri jireen hadba meeshii ugaar ama qadhaab leh.

3) **Tusaale Bare:**

- 1) Baruhu ha ka dhaadhiciyo ardayda in dadku garab-
rarato ahaa, maxaa yeelay xoolo rabbeysan lama
haysan.
- 2) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda:
 - b) Garabrarato;

- t) Quud;
- j) Hayaan, hayaami jireen;
- x) Rabbeyn;

4) Hawlaha Ardayda:

Ardayda u qaybi kooxo, dabadeedna ha masilaan dad garabarato ah oo geedi ah. (Koox waliba ha ka koobnaato Aabbe, Hooyo,iyo Carruur).

5) Laylis:

- 1) Dadkii hore maxay u guuri jireen?
- 2) Maxay miruhu u yaraan jireen?
- 3) Maxaa ugaar loo waayi jirey?
- 4) Xaggee baa dadku u guuri jirey?

RABBAYNTII XOOLAHA

Ujeeddada casharkan ka dambaysaa waa ardayda oo ogaata in rabbayntii xooluhu wax weyn ka beddeshey noloshii dadkii hore. Taas oo saddex faa'iido u keentay dadka:

- 1) Dugaaggii oo uu ka nabadgalay markuu eeyga rabbaystay;
- 2) Welwelkii gaajada oo ka haray;
- 3) Socodkii badnaa iyo dhibaataadii ugaarsiga oo ka yaraatay;



2) Dulucda Casharka

Dadkii hore muddo badan bay ugaarsi ku noolaayeen. Ugaarsigu wuxuu lahaa dhibaatooyin fara badan. Markii dambe, dadku wuxuu bartay rabbaynta xoolaha.

Xayawaankii ugu hor rabbaismay, wuxuu ahaa eeyga; sababta oo ah iyada oo eeygu cuni jirey lafaha xawayaanka

dadku soo ugaarsado, sidaas darteed, ayuu eeygu dadku ugaga dhawaa xawayaanka kale. Muddo dabadeed waxa rabbaysmay xawayaanka laga helo cadka iyo caanaha sida: ariga, Lo'da iyo Geela.



3) Tusaale Bare

- 1) Baruhu waa inuu ardayda ka raarida (u caddeeyaa) inaanu dadku markuu xoolaha rabbaystay meel iska deggin ee sida xoola raacatadeenna maanta hadba meesha doog iyo biyo leh uu u guuri jirey.
- 2) Baruhu waa inuu ardayda u sheegaa in xoola-rabbaystu ku bilaabantay maqal hooyadeed la diley ama carartay.
- 3) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Rabbayn, doog, geedo.
- 4) Baruhu ha kala saaro qaybaha xoolaha, sida: Kuwa la dhaqdo, dugaagga iyo ugaarta.

4) Hawlaha Ardayda:

- 1) Baraha iyo ardayda oo wada jiraa ha isku dayeen inay dhaqaan digaag.
- 2) Baruhu ha faro ardayda inay gurigooda ku rabbeeyaan xawayaan sida: bisad, digaag, daayeer iyo iwm.


5) Laylis:

- 1) Sheeg afar ah xayawaanka dadka la noolaada?
- 2) Sheeg afar dugaag ah magacyadooda?
- 3) Sheeg saddex ugaar ah magacyadooda?

Casharka Snanaad
FAA'IIDOOYINKA XOOLAHA RABBAYSMAY

1) **Ujeeddo:**

Ujeeddada casharkani waa in baruhu ardayda ka dhaadhiciyo faa'iidooyinka badan ee rabbaynta xooluhu dadka u keentay.



Awr raran

2) **Dulucda Casharka**

Dadku markii ay xoolaha rabbaysteen faa'iidooyin badan bay ka heleen. Faa'iidooyinkaas waxa ka mid ah:

- 1) Caano;
- 2) Subag;
- 3) Hilib;
- 4) Hu;
- 5) Gaadiid;
- 6) Wehel iyo iwm.

3) Tusaale Bare

- 1) Baruhu waa inuu si aad ah ardayda uga dhaadhiciyaa in dadka Soomaaliyeed 75% ay noloshoodu ku tiirsan tahay xoolaha.
- 2) Baruhu waa inuu macneeyaa ujeeddada «huga» laga leeyahay kabaha iyo wixii la mid ah ee laga sameeyo saanta ama hargaha.

4) Hawlaha Ardayda:

- 1) Baruhu waa inuu fasalka kooxo u qaybiyaa. Koox walbana u diraa hawl gooni ah sida qiimaha ariga, Lo'da, geela, haraga, subagga, caanaha, hilibka, iyo wixii la mid ah.
- 2) Koox waliba waa inay uga warrantaa fasalka hawshedii.

5) Laylis:

- 1) Sheeg saddex xayawaan oo gaadiid laga dhigto?
- 2) Sheeg afar wax oo hargaha laga sameeyo?
- 3) Sidee baa subagga loo sameeyaa?
- 4) Sheeg saddex xawayaan oo cad iyo caanaba laga helo?

Casharka Lixaad

BARASHADA HUGA

1) Ujeedo:

Ujeeddada casharkani waxa weeye in ardaygu ogaado huga uu maanta huwan yahay wax dhawaan soo baxay inuu yahay doorar badan iyo is beddel badanna soo maray.



Qof caleen xiran.

2) Dulucda Casharka

Dadkii hore dharka ma aqoon, noloshooduna waxay ahayd ta xawayaanka oo kale. Muddo dabadeed wuxuu bartay inuu caleenta dhirta ama cawska cawradiisa ku qariyo. Markii xigtay wuxuu bartay inuu hu ka dhigto saanta xawayaanka uu ugaarsado. Aqoonta dadku markay korodhay, wuxuu gaaray heer uu ku samaysto dhar.



Qof saan xiran.

3) **Tusaale Bare**

- 1) Baruhu ha ukala caddeeyo ardayda macnaha ereyada soo socda: Hu' iyo Dhar, Saan iyo Harag, Caleen iyo Caws.
- 2) Baruhu ha u sheego ardayda in Soomaalidu, hu, la yiraahdo «dhuug» kasameysan jirtey saamaha xoolaha.
- 3) Baruhu ha la kaashado dadka aqoonta u leh sida loo sanayn jirey «dhuugga».

3) Baruhu ha tuso ardayda «dhuug» iyo hargo la magdiyey meesha laga heli karo sida: «Muyuusimka» Xamar oo kale iyo Warshadda Hargaha.

4) **Hawlaha Ardayda:**

Baraha iyo ardayda oo iskaashanaya hargo ha magdiyaan.


5) **Laylis:**

- 1) Dadkii hore muxuu xiran jirey?
- 2) Sheeg laba wax oo ay cawradooda ku qarin jireen?
- 3) Dhuugga maxaa laga sameeyaa?
- 4) Sheeg laba wax oo saamaha ama hargaha laga sameeyo?

Casharka Toddobaad
FAA'IIDOOYINKA HUGA

1) Ujeedo:

Ujeeddada casharkani waa in ardaygu garto in hugu uu nolosha dadka u yahay wax lagama maarmaan ah.



«Alindi» dhar lagu sameynayo.

2) Dulucda Casharka

Hugu faa'iidooyin badan oo aan la koobikarin buu dadka u leeyahay, waxaana ka mid ah:

- 1) Dugsoon buu dadku ka helay;
- 2) Roobka ayuu ka huwadey;
- 3) Dhaxantuu ka celiyey;
- 4) Cadceeduu ka celiyey;
- 5) Qurux buu u taray.



Ruux dumar ah oo gacanta dhar ku samaynaysa.

3) **Tusaale Bare**

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyga «Alindi) oo ah alaabta dharka, Benaadir, loo yaqaan lagu sameeyo.
- 2) Baruhu ha u sheego ardayda in dharka dalkeenna lagu sameeyo badidiisu ka soo baxdo warshadda dharka ee Balcad.

4) **Hawlaha Ardayda:**

- 1) Baruhu ha u diro ardayda inay soo arkaan meelaha dharka gacanta, ama alindiga lagu sameeyo. Kadibna ha ka sheekeeyaan waxay soo arkeen.
- 2) Dugsigu ha ku dedaalo in la helo dunta funaanadaha ama koofiyadaha, dabadeedna ardaydu ha isku-daydo inay sameeyaan koofiyado ama funaanado. Sameynta waa in lala kaashadaa dadka aqoonta u leh.

5) **Laylis:**

- 1) Sheeg saddex faa'iido oo hugu leeyahay?
- 2) Dharka aad dugsiga la timaado halkee baa lagu sameeyaa?
- 3) Dharka Benaadiriga ah maxaa lagu sameeyaa?
- 4) Sheeg saddex dharka haweenka miyigu xirtaan ah?
- 5) Sheeg saddex dharka haweenka magaaladu xirtaan ah?
- 6) Sheeg saddex dharka ragga magaaladu xirtaan ah?
- 7) Sheeg saddex dharka ragga reer miyigu xirtaan ah?

QODAALKA BEERAHA

1) **Ujeeddo:**

Ujeeddada casharkan laga leeyahay waa in ardaydu ogaato in qodaalku u sabab ahaa degganaanta oo uu ka baxay dadku noloshii geediga ahayd.



Nin miige beer yar ku qodaya.

2) **Dulucda Casharka:**

Dadkii hore waxay ogaadeen in iniinta dhirta ka dhacdaa hadday biyo hesho ay baxayso. Markaasay bilaabeen inay wax beertaan. Qalabkii ugu horreeyey ee beeraha lagu falo wuxuu ahaa (Miige). Dadku markii dambe wuxuu bartay inuu miigihii (ushii) dhagax uu qoray ku xiro oo sidii yaambo u isticmaalo.

Dadkii hore wuxuu kordhiyey hagaajinta qalabka beeraha; waxayna barten sida xayawaanka loogu falo beeraha Kuwaas waxa ka mid ahaa, dibida. Intii ay awel gacanta ku qodi jireen in ka badan bay awood u yeeshen. Miro badanna way uga baxeen. Wixii cuntadooda uga harana way kaydsadeen



Qof yaambo beer ku falaaya.

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha u sharxo ardayda ereyadan soo socda:
Miige (ul beeraha lagu qodo), falis, yaambo, qodaal.
- 2) Isaga oo la kaashanaaya degaanka uu joogo, Baruhu ha baro hana tuso ardayda qalabka beeraha lagu falo.
- 3) Baruhu ha u sheego ardayda in xawayaanka kale sida awrta, fardaha, iyo dameerahaba lagu qoto beeraha.
- 4) Baruhu aradayda ha baro qalabka beeraha lagu gooyo sida «Majada».
- 5) Baruhu ha ku dedaalo inuu ardayda tuso beer la qodayo iyo mid la goynayoba.
- 6) Baruhu ha u sheego ardayda qalabka cusub ee hadda beeraha lagu qodo sida cagaf - cagafta.



Dibi beer lagu qodayo

4) **Hawlaha Ardayda:**

Baraha iyo ardaydu ha ka sameeyaan beer yar dugsiga. Ardayduna ha qodaan, ha beeraan, ha waraabiyaan, hana gooyaan (Sannadka oo dhan ha socoto hawshaasi).

5) **Laylis:**

- 1) Dadkii hore sidee bay u ogaadeen ama u barteen wax beerista?
- 2) Qalabkii ugu horreeyey ee dadkii hore wax ku qo-teen muxuu ahaa?
- 3) Sidee bay u samaysteen yaambadii u horreeysey?
- 4) Sheeg wax ka baxa degmada aad ku nooshahay?

Casharka Sagaalaad

FAA'IIDOOYINKA BEERASHADA

1) Ujeeddo:

Ujeeddada casharkani waa in ardaygu barto in beerashadu ahayd horumarkii ugu weynaa ee dadkii hore gaareen.

2) Dulucda Casharka:

Beerashadu waxa weeye horumarkii ugu weynaa ee dadkii hore gaaro maxaa yeelay waxay keentay.

- 1) Noloshii geediga ahayd bay dhaafeen oo way deggeen.
- 2) Waxay heleen waqti firaaqo ah oo ay ku fakeraan, wax cusubna ku soo saaraan.
- 3) Tuulooyin iyo magaalooyin ayaa dhismay kolkii la deggey.
- 4) Wax iibsasho iyo ganacsi baa bilaabmay.
- 5) Dawladnimo iyo is xukun baa yimid.
- 6) Ilbaxnimo ayaa dhalatay.

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Ganacsi, ilbaxnimo, isxukun, dawladnimo.
- 2) Baruhu si faahfaahsan ha u sharxo waxa looga jeedo waqti firaaqo ah — Waqti firaaquhu ma aha waqti la cayaaro ama la raxeeysto oo kaliya ee waxa weeye waqti lagu fikiro in waxyaalo cusub oo nolosha dadka waxtar u leh la soo saaro.
- 3) Baruhu ha tilmaamo isxukunku heerarkii uu soo maray sida xaas, beeldaajiye (odayaasha), xukun dawla-deed.
- 4) Baruhu waa inuu ardayda baraa nidaamka xukunka dugsiga horjoogaha fasalka, guddiyada ardayda maamulka dugsiga iyo iwm).

4) Laylis:


- 1) Ilbaxnimadu waa maxay?
- 2) Goormay tuulooyinka iyo magaaloooyinku dhismeen?
- 3) Sheeg saddex faa'iido oo ay wax beeristu keentay?
- 4) Maxaa loola jeeda «waqti firaaqo ah»?

Casharka Tobna

QALABKII DADKII HORE

1) Ujeeddo:

Casharkan ujeeddadiisu waa inay ardaydu ogaato in qalabka dadku ku adeegtaa heerar kala geddisan soo marayn.



2) Dulucda Casharka:

Nolasha dadkii hore waxba kama geddishayn (duwanayn)

noloshii xawayaanka. Cunnadiisa siduu ku soo saari jirey waxay ahayd ugaarsi iyo qadhaabsi. Dadku markaas ma haysan wax qalab ah oo ka caawiya shaqadiisa. Hubka keliya ee uu haystey wuxuu ahaa dhagax iyo burar uu dhirta ka goosan jirey.

Dadku markii uu muddo dhagaxa sidii dabeecadu u samaysay ugu shaqaysanayey, ayuu isku dayey inuu qalabkiisa hagaajiyo. Dhagaxii awel sidiisa loo isticmaali jirey baa la qoray oo faasas, mindiyo, warmo iyo qalab kale oo badan laga sameeyey. Muddo badan ka dib ayaa dadkii wuxuu awood u yeeshay inuu barto macdanta iyo sida wax loogu qabsado.

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu waa inuu ardayda u sheegaa in waqtigaas culimada taariikhdu u taqaan «Waqtigii Dhagaxa»;
- 2) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Dabeecadda, awood, macdan;
- 3) Baruhu ha u faahfaahiyo ardayda waxa looga jeedo «qalab».

4) Hawlaha Ardayda:

- 1) Baruhu ardayda ha u diro inay sameeyaan qalab kala duwan oo dhagax ama qori laga qoro.

5) Laylis:

- 1) Qalabkii dadkii hore maxaa laga sameyn jirey?
- 2) Dadkii hore siday qalabka u sameyn jireen?
- 3) Sheeg saddex shay oo qalabkii dadkii hore ka mid ahaa?

HOOYGII DADKII HORE

1) Ujeeddo:

Ujeeddada casharkani waa in uu ardaygu ogaado in hooygu lagama maarmaan u yahay nolosha dadka.



Nin geed libaax ka koray.

2) Dulucda Casharka:




Nolosha dadka waxa lagama maarmaan u ah saddex shay kuwaas oo ah: cunto, hooy iyo hu.

Dadkii hore may lahaan jirin aqaladeenna oo kale. Dadku markii u horreeysey waxay u hoyan jireen dhirta korkeeda; si ay uga nabad galaan dugaagga. Dadka garaadkiisu markuu kordhay wuxuu bartay inuu u hooydo godadka. Taas oo ay ka helayeen dugsoon iyo nabadgelyo.



Xaas god ku jira.

Dadku markuu xoolaha rabbeystay meel keliya ma degin ee sida xoola-raacatadeenna maanta ayey xoolahooda kolba halkii doog iyo biyo leh u raaci jireen. Sidaa darteed, dadkii hore waxay u baahdeen guryo ay la guuri karaan, waxayna samaysteen aqalo ka samaysan qoryo, mayrax, caws iyo caleenta dhirta. Aqaladaas waxay u dhowaayeen «Aqal Soomaaliga».



Dadku markay degeen ee ay beeraleyda noqdeen waxay samaysteen guryo joogta ah. Kuwaas oo ay ka mid ahaayeen Cariishyada, Mudulayaasha, Dergadaha iyo Saraha.

3) **Tusaale Bare:**

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Hooy, Hu, Mudul, Cariish, Dergad, Sar, Joogto, Dugsoon, Xoolo-raacato iyo Garaad.

2) Baruhu ha tuso ama ha u sharxo ardayda habka laala duwan ee guryaha loo dhiso.

4) **Hawlaha Aardayda:**

Ardaydu ha isku dayaan inay saawiraan aqal Soomaali, Mudul, Sar iyo wixii la mid ah.

5) **Laylis:**

1) Guriga aad ku nooshahay waa nooccee?

2) Reer guuraaga guryahoodu waa nooccee?

3) Beeraleyda guryahoodu waa nooccee?

FAA'IIDOOYINKA HOOYGA

1) **Ujeeddo:**

Ujeeddada casharkani waa inay aradaydu barato waxtarka hooyga.

2) **Dulucda Casharka:**

Casharradeenii hore waxaynu ku soo baranay sidii dadkii hore uga faa'iidaystey xoola dhaqashada iyo beerashada. Hooyguna wuxuu ka mid yahay waxyaalaha dadku bartay; Faa'iidooyin badanna ka helay. Faa'iidooyinkaas waxa ka mid ah.

- 1) Dhaxanta oo uu ka celiyey;
- 2) Roobka oo uu ka jirsaday;
- 3) Qorraxda oo uu ka harsaday;
- 4) Dabaylaha oo uu ka galay;
- 5) Nabadgelyo weyn oo uu ka helay.

3) **Tusaale Bare:**

Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Jirsaday, Harsaday, Hooy.

4) **Hawlaha Ardayda:**

Ardaydu ha qoraan ama ha sameeyaan liistooyin ah noocyada guryaha magaaladooda, sida aqal Soomaali, cariish, sar iyo wixii la mid ah.

5) **Laylis:**

- 1) Sheeg saddex faa'iido oo hooygu leeyahay?
- 2) Aqal Soomaaliga maxaa laga sameeyaa?
- 3) Sarahaan maxaa laga sameeyaa?

BILAWGII DOORISKA

1) Ujeeddo:

Ujeeddada casharkani waa in uu ardaygu ogaado inaan berigii hore lacagi jirin, ee isdhaafsi wax lagu kala gadan jirey.



Laba qof oo wan iyo haruur kala 'oorsanaya.

2) Dulucda Casharka:

Dadkii hore ma uu aqoonin lacagta iyo sida wax loogu qiimeeyo. Qofka beeraleyda ahi wuxuu hayn jirey cunto; qofka xoola dhaqatada ahina wuxuu hayn jirey xoolo nool oo cad iyo caano leh. Sidaas oo kale ayaa birtunkuna wuxuu hayn jirey qalab sida warmaha, mindiyaha iyo gudmaha. Qof waliba qofka kale ayuu waxa baahidiisa dheer kaga doorsan jirey waxa uu u baahan yahay. Waqtigaas waxa lagu magacaabaa «Waqtigii Dooriska».

3) Tusaale Bare:

1) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Dooris, qiimeyn, isweydaarsi, baahi.

4) Hawlaha Ardayda:

1) Baruhu ardayda ha u qaybiyo kooxo dibbadana ha u saaro. Koox waliba ta kale ha ka yar fogaato hana masilaan waxa is doorisiga casharka ku saabsanaa.

5) Laylis:

1) Waa maxay doorisku?

2) Dadkii hore sidee bay wax u kala gadan jireen?

3) Maxaa keenay dooriska?

Casharka Afar iyo Tobnaad

DHIBAATOYINKA DOORISKA

1) Ujeeddo:

Ujeeddada casharkani waa in ardaydu ogaato in dooriska lagu kala bursan jirey.

2) Dulucda Casharka:

Doorisku dhibaatooyin badan buu lahaa. Waxa kuwaas ka mid ah:

- 1) Wax qiime go'an leh oo wax lagu iibsadaa ma jirin;
- 2) Marka wax la kala doorsado qof uun baa bursan jirey;
- 3) Dhibaatooyin badan buu kala kulmi jirey qofku intaanu helin qof wax u dooriya;
- 4) Goobta aad joogto ama meel u dhow oo keliya ayaa wax laga doorsan kari jirey.

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyadan: Bursi, qiime, go'an.
- 2) Baruhu ha faahfaahiyo dhibaatooyinka qofku dooriska kala kulmi jirey sida raadiska qof wax ka doorsada iyo qaadista alaabta uu doonayo inuu doorsado.

4) Hawlaha Ardayda:

- 1) Baruhu ardayda ha u qaybiyo koox dibbadana ha u saaro. Koox waliba ta kale ha ka yar fogaato hana masilaan wax kala doorsigii casharku ku saabsanaa.

5) Laylis:

- 1) Barisku waa maxay?
- 2) Sheeg saddex dhibaato uu doorsigu leeyahay?
- 3) Sidee dadkii hore wax u kala gadan jireen?

Casharka Shan iyo Tobnaad

LACAGTA

1) Ujeeddo:

Ujeeddada casharkani waa in ardaydu ogaato in lacagtu fududaysay wax kala iibsashada iyo ganacsiga guudba.



Qof dukaan lacag wax kaga gadanaya.

2) Dulucda Casharka:

Dadkii hore markay arkeen dhibaatooyinkii badnaa ee dooriska ayey ku kaliftey in si kale oo wax loo kala iibsado ay ka fakeraan. Taas oo noqotay isticmaalka lacagta.

Lacagtu waxay fududaysay wax kala iibsashadii, waxay na ka furatay dadka dhibaatooyin fara badan. Maanta waxaad doontoba waxaad ku gadan kartaa lacag, waayo wax

walba oo la kala iibsadaaba wuxuu leeyahay qiime lacageed oo go'an.

3) **Tusaale Bare:**

- 1) Baruhu ha tuso hana baro ardayda qiimaha lacagta Soomaaliyeed ee warqadaha ah (5/= , 10/ = , 20/ = , 100/ =).
- 2) Baruhu ardayda ha geeyo suuqa oo ha tuso meelo kala duwan oo wax lagu kala gadanaayo.
- 3) Baruhu ha ka dhaadhiciyo ardayda in lacagtu aanay waxba tarin haddii wax lagu iibsadaa aaney jirin.

4) **Hawlaha Ardayda:**

- 1) Baruhu ardayda ha u qaybiyo kooxo hana jilaan dad wax kala gadanaaya.

5) **Laylis:**

- 1) Lacagtu maxay tartaa?
- 2) Dhibaatooyinka lacagtu dadka ka furatay maxaa ka mid ah?
- 3) Dadkii hore siday wax u kala iibsan jireen?

Casharka Lix iyo Tobnaad

FAA'IIDADA LACAGTA

1) Ujeeddo:

Ujeeddada casharkani waa in ardaygu ogaado in waqtigii doorista laga soo gudbey maantana ganacsigu lacag la'aan aannu suurtoobayn.

2) Dulucda Casharka:

Dhibaatooyin aad u fara badan bay lacagtu dadka ka furatay; faa'iidooyin badanna way keentay. Kuwaas oo ah:

- 1) Qiime go'an oo laysla yaqaan baa wax lagu kala iib-sadaa;
- 2) Marka laba qof wax kala gadanayaan, qofna qofka kale kama bursan karo;
- 3) Lacagtu aad bay u fududdahay oo meeshii la doono loo qaadan karaa;
- 4) Lacagta meel kasta wax baa lagaga gadan karaa;
- 5) Dalalka dibedda ayaa ganacsi lala yeelan karaa oo waxaad u baahan tahay ayaad kaga iibsana kartaa.

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha sharxo ereyada soo socda: Ganacsi, Gudub, Fudud.
- 2) Baruhu ha hubiyo inay ardaydu kala taqaan qiimaha lacagta waraaqaha ah iyo tan macdanta, ama sarrifka ah ee dalkeenna.

4) Hawlaha Ardayda:

- 1) Aardaydu ha ka sheekeeyaan siday wax u iibsadaan waqtiga biririfta iyo waqtiyada kale ee fasaxa ay yihiin.

5) Laylis:

- 1) Sheeg afar faa'iido oo lacagtu leedahay?
- 2) Sheeg saddex dhibaato oo doorisku lahaa?
- 3) Shilinku waa imisa ganbo ama kuumi?

Casharka Toddoba iyo Tobnaad

HELISTII DABKA

1) Ujeeddo:

Casharkani wuxuu gogoldhig u yahay casharrada soo socda ee ku saabsan dabka.



Kayn gubanaysa qofna fiirinaayo.

2) Dulucda Casharka:

Dadkii hore siday markii u horreysey dabka u barten waxay ahayd: Marka roobabku da'aan danabada ka dhaca baa dhirta gubi jirey. Dabadeedna waxa dhici jirey inay dabayluhu dabka fidin jireen oo ay gaarsiin jireen dhir badan.

Dadku markii u horreysey wuu ka baqan jirey dabka; maxaa yeelay wuxuu arkay qiiqa (qaaca), oolka iyo siduu dhirta u gubayey.

Markii dambe wuxuu arkay in ugaarta qaarkeed ku dho-

vaanayaan dabka si ay u dugsadaan; dadkuna waxa uu ku deyday ugaartii **ilaa** ay ka barten faa'iidada dabku leeyahay.

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Danab, qiiq (qaac), olol, dugsadaan, fidin.
- 2) Baruhu waa inuu ardayda^{ka} dhaadhiciyaa dhibaatoyinka iyo halista dabku keeni karo haddii aan laga digtoonaan. (Ardaygu ha ka digtoonaado nalka, taraqa, dhuxusha nool oo lagu ciyaaro, iwm).

4) Laylis:

- 1) Siday dadkii hore dabka u barten?
- 2) Dabkii u horreeyey xagguu ka yimid?
- 3) Dabku siduu u fidi jirey?
- 4) Muxuu dadku uga baqan jirey dabka?
- 5) Maxaa dhici kara haddii dabka lagu ciyaaro?

FAA'IIDOOYINKA DABKA

1) Ujeeddo:

Ujeeddada casharkani waa inuu ardaygu ogaado waxtarka dabku u leeyahay nolosha dadka.



Qof hilib dab ku solanaaya.

2) **Dulucda Casharka:**

Dadkii hore waxay ogaadeen inuu dabku faa'iidooyin badan u leeyahay. Faa'iidooyinka uu ka helayna waxa ka mid ah:

- 1) Diirimaad iyo dugsoon buu ka helay oo wuu kulaalay;
- 2) Iftiin iyo ilays buu ka helay oo habeenkii waxay ku ifsan jireen godadka iyo meelaha kale ee mugdiga ah.
- 3) Cuntadii buu ku bislaystay; markuu ogaaday in hilibka la kariyaa ka jilicsan yahay kana macaan yahay hilibka qeedhiin (ceeriin).
- 4) Nabadgelyo ayuu ka helay; oo dugaagga soo weerara ayuu iskaga celin jirey.

3) **Tusaale Bare:**

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Soley, Mugdi, Ilays, Iftiin, Weerar, Bislayn iyo Diirimaad.
- 2) Baruhu faa'iidooyinka dabka ee aan kor ku sheegnay ardayda isagu ha tuso intii u suuroobi karta, sida kulaalista dabka iyo kariska cuntada.

4) **Laylis:**

- 1) Sheeg saddex faa'iido oo dabku leeyahay?
- 2) Sheeg laba dhibaato oo dabku leeyanay?
- 3) Cuntada maxaa loo bisleeyaa (Kariyaa)?

Casharka Sagaal iyo Tobnaad

SAMAYNTII DABKA

1) Ujeeddo:


Ujeeddada casharkani waa in ardaydu ogaato in dadku awood u yeeshay inuu dab samaysto markuu u baahdoba.



Qof madag dab kala baxaya.

2) Dulucda Casharka:

Markuu dadku arkay faa'iidooyinkii dabku u yeeshay no-loshiisa, waxaa lagama maarmaan noqotay inuu ka kaaftoomo dabbkii uu ka qaadan jirey dhirta danabku gubo, oo isagu marka uu u baahdo dab shito.



Waxyaalaha la shito: Taraq, Shamac, Faynuus iyo Nal.

Dadku wuxuu ogaaday in waxyaalaha dab laga hursan karaa ay ka mid ahaayeen: Madagta iyo dhagxanta qaarkeed oo marka la isku dhifto dab ka holco.

3) **Tusaale Bare:**

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Kaaftoomo, Madag, Huris, Holco.
- 2) Baruhu ha kala sooco waxyaalaha la ifsado iyo kuwa wax lagu hursado, sida:
 - b) Tarraga, Shamaca, Laambadda, Faynuuska, Tirriga iyo nalka.
 - t) Xaabbada, dhuxusha, gaaska (Shooladda) iyo nalka.

4) **Laylis:**





- 1) Muxuu dadkii hore dabka ka samaystay?
- 2) Goormaa dadkii hore ka kooftoomay dabkii dabanabka?
- 3) Sheeg magacyada saddex shay oo wax lagu karsado?
- 4) Sheeg magacyada saddex shay oo la ifsado?
- 5) Sheeg magacyada laba shay oo marna la ifsado, marna wax lagu karsado?

Casharka Labaatanaad

M A C D A N T A

1) Ujeeddo:

Ujeeddada casharkani waa ma'u ardaygu ogaado horu-markii helistii macdantu keertay.



Qalab ka samaysan macdan: faas, mindi, faynuus iyo diksi.

2) Dulucda Casharka:

Dadkii hore wuxuu arkay markuu dab shito in dhagaxa qaarkii dhalaalo; markuu qaboobna wax dhagaxii ka duwan

kana adag uu noqdo. Taasi waxay awood u siisay inuu barto siduu uga samaysan lahaa qalab cusub oo kii hore ee dhagaxa ahaa ka duwan kana adag, waxyna ka samaysteen leebab, warmo, mindiyo iyo qalab kale oo la mid ah.

Waqtigaas waxa xagga taariikhda looga yaqaan: «Waq-tigii macdanta».

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha faahfaahiyo waxa macdanta looga jeedo.
- 2) Baruhu ha ka raarido ardayda in «Waqtigaa Macdanta» wixii ka horreeyey dadku qalabka ka samaysan jireen dhagax iyo qori.
- 3) Baruhu ha baro ardayda sida dadkii hore u kala hor bartay noocyada macdanta sida maarta, birta, naxaasta, dahabka, iwm.
- 4) Baruhu ardayda wax ha uga sheego faa'iidooyinka macdanta.
- 5) Baruhu ha geeyo ardayda meelaha wax lagu tumo sida birtunka iyo dahablaha.

4) Hawlaha Ardayda:

Baruhu ardayda kooxo ha u qaybiyo; koox walibana wax ha ka keento macdanta ay qaateen.

5) Laylis:

- 1) Sidee baa dadku markii u horreysay macdanta u barteen?
- 2) Sheeg afar macdanood oo kala duwan?
- 3) Maxay macdantu kaga fiican tahay dhagaxa iyo qoriga?
- 4) Sheeg saddex shay oo macdanta laga sameeyo iyo waxa lagu qabsado?
- 5) Dahabku muxuu faa'iido leeyahay?

Casharka Kow iyo Labaatanaad

SHAQO QAYBSI

1) Ujeedo:

Casharkan waxa looga dan leeyahay inay ardaydu ogaato in shaqadu dadka sharaf u tahay. Horumarka isdabajooga ah ee adduunka ka socdaana ku yimid shaqo qaybsiga dadka. Shaqo qaybsiguna inuu keeno iskaashiga dadka iyo hindisaha cusub.





Shaqale kala duduwaan:

Nijaar, cunto kariye, birtun, dawaare iyo wasdaad (fundu).

2) **Dulucda Casharka:**

Dadku markii uu degey ee beeraleyda noqday wuxuu helay waqti firaqo ah oo uu ku fekeru. Taas waxay siisay fursad qof kastaaba shaqada la habboonaata ama uu jecleysto uu ku qabto. Qaar waxay noqdeen beeraley, kuwana Birtun-no dar kalena wastaado (fundiyaal).

Farsamooyinkaas kala duwani waxay dadka u keeneen barwaaqo; maxaa yeelay qof waliba wuxuu helay wixii uu u baahnaa oo uu ku doorsaday wixii uu hestay isagu.

Shaqo qaybsigu wuxuu qiime weyn sii yeeshay markii macdanta la helay. Helistii macdanta iyo waqti firaqihii waxay wadajir dadka ugu suura geliyeen in shaqadu qaybsanto oo qof waliba isku dayo inuu wax cusub soo saaro, taas oo aad loogu guuleystey.

Markii macdan cusub la helaba waxaa sii kordhay ku talaxtagii sancada iyo wax soo saaridda, waxaana badatay shaqadii iyo isubaahnaantii shaqaalaha.

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ereyada soo socda ha sharxo: Fursad, farsamo, barwaaqo, habboonaan, hindise dar kale, talaxtag, sanco.
- 2) Baruhu ha ka dhaadhiciyo ardayda qiimaha iyo shaarfa ay leedahay shaqada gacantu.
- 3) Baruhu ardayda ha ka dhaadhiciyo shaqo qaybsigu xiriirka fiican ee dadka dhexdiisa uu ka sameeyo.
- 4) Baruhu ha ka kaashado casharkan farsamo yaqaannada kala duwan sida: Nijaar, Birtun, Kaboole, Iwm.

4) Hawlaha Ardayda:

Baruhu ardayda ha u diro mid waliba hawsha uu jecel yahay.

5) Laylis:

- 1) Waa maxay shaqo qaybsigu?
- 2) Sheeg saddex shaqo oo gacanta laga qabto?
- 3) Sheeg saddex shey oo macdan ka samaysan oo gurigiina yaal?
- 4) Dawanka (Jeras) dugsigu muxuu ka samaysan yahay?
- 5) Shaqada aabahaa qabtaa waa maxay?
- 6) Shaqada hooyadaa qabataa waa maxay?
- 7) Shaqada aad gurigiina ka qabataa waa maxay?

JUQRAAFI


QAYBTA

LABAAD

Casharka Kowaad

D A D

Ujeedada casharkan ka dambeysa waa in ardaygu wax ka barto dhismaha ummadda, wadajirka iyo iskaashiga.




Xaas: Aabbe, hooyo iyo carruur.

1) Dulucda casharka :

Dal kasta oo adduunka ku yaal waxa ku nool dad, sidaas darteed Soomaaliyana waxa ku nool dadka Soomaaliyeed. Dadweynahu wuxuu ka koobmaa xaasas badan oo danta guud ahaaneed ka wada dhaxayso.

Xaasku mese!an: wuxuu ka kooban yahay dhowr qof oo mid waliba shaqo gaar ah qabto, hase yeeshee; dheefta isku darsada.



Dad badan oo iskaa-wax-u-qabso ka shaqaynaya

Qofku kelidii waa taag yar yahay wax weynna ma qabsan karo; wadajirka dadku se wuxuu dhaliyaa miro fiican, wuxuuna abuuraa xoog is-haysta oo cadow kasta ka gacan sarreeya. Wadajir waa la guulaystaa kala tagna waa la jabaa.

2) Tusaale Bare :

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: dheef, dan, gacan sarreyn, guulaysta, la jabaa.
- 2) Baruhu ha ka dhaadhiciyo ardayda inaan dalka iyo dadku kala maarmin.
- 3) Baruhu isaga oo la kaashanaya cayaartoyga dugsiga, ardayda ha tuso faa'iidooyinka iskaashiga iyo wada shaqaynta.
- 4) Baruhu ha baro ardayda in wax isweydaarsiga dhexdoodu uu yahay iskaashi (sida qalinka, istiikadda, iwm).

3) Hawlaha Ardayda:

- 1) Baruhu ha u diro arday walba ul yar; dabadeedna ha isku xidho ulihii oo dhan. Arday waliba ha isku dayo inuu jebiyo xirmada ulaha. Marka dambe ha la kala furo oo mid mid ha loo jebiyo.
- 2) Baraha iyo ardaydu ha ka qayb galaan shaqooyin


4) Laylis:

- 1) Dadweynuhu muxuu ka koobmaa?
- 2) Maxay uluhu markay isku xirnaayeen u jabi waa-yeen?
- 3) Maxaa ka mid ah shaqada hooyada iyo aabbuhu qabataan?
- 4) Maxaad gurigiina shaqo u qabataa?
- 5) Maxaa dadku uga wada shaqeeyaa «Iska-wax-uqabso»?
- 6) Sheeg wax dawyenaha faa'iido u leh oo Iska-wax-uqabso lagu dhisay?

BULSHADA SOOMAALIYEED

1) Ujeeddo:

Ujeedada casharkani waa in ardaygu wax ka barto nolosha bulshada Soomaalyeed.




Safar magaalo ku socda

2) Dulucda Casharka:

Dadweynaha Soomaalyeed wuxuu u qaybsamaa reer miyi iyo reer magaalo. Reer miyigu wuxuu ka kooban yahay beeraley iyo xoola raacato.

Beeraleydu waxay beeraan cuntada, xoola raacataduna waxay dhaqaan xoola nool, reer magaaluhuna wuxuu qabtaa shaqooyin kuwaa ka duwan oo lagama maarmaan ah sida garacsiga. Qayb kasta oo bulshada ka mid ahiba waxay qabata shaqo u gaar ah oo nolosheeda ku habboon, hase yeeshee: dhammaantood wey iskaashadaan oo ma kala maarmaan.



Dhar la gadayo

Dawladdu waxay ka mid tahay dadweynaha, waxayna ka shaqaysaa danaha dadka oo ay ka mid yihiin nabadgelyada, caafimaadka, waxbarashada, xannaanada xoolaha iyo beeraha.

3) Tusaale Bare:

1. Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Bulsho, xannaano, ku habboon.
2. Baruhu aad ha u sharxo shaqooyinka reer magaalaha ee kala duwan sida dukaanley, cunto kariye, nijaar, askari, ~~da~~dkhtar, iwm.
3. Baruhu ardayda ha geeyo hana tuso meelaha bulshada kala duwan ay ku arki karayaan (sida dukaan, seylad, makhaayad, sariibadda xoolaha).

4) Hawlaha Ardayda:

1. Baruhu ha u qaybiyo ardayda kooxo. Dabadeedna koox walba ha u diro waraysi; koox kastaana fasalka ha uga sheekayso hawsheedii (sida Boliska, sariibadda caanaha iyo khudradda, seyladda xoolaha nool, iwm).

5) Laylis:

1. Sheeg saddex shay oo reer magaaluhu reer miyiga uga baahan yihiin.
2. Sheeg saddex shay oo reer miyigu reer magaalaha uga baahan yahay.
3. Sheeg afar shay oo dawladdu bulshada u qabato.

Casharka Saddexaad


X O O L A H A

1) Ujeeddo

Ujeeddada casharkani waa in ardaygu ogaado in xooluhu yihiin tiir ka mid ah tiirarka nolosha dadka.

2) Dulucda Casharka:

Waxyaalaha dadku ku nool yahay wax ka mid ah cuntada, biyaha iyo hawada. Cuntada waxaynu ka helnaa xoolaha nool iyo dhirta. Xoolaha waxa ka mid ah geela, adhiga, lo'da iyo d'gaagga.



Xoolo: Geel, Lo', Dameer iyo Faras

Caanaha, hilibka, subagga, iyo ukunta intaba waxaynu ka helnaa xoolaheena. Dadka Soomaaliyeed 75% baa ku nool xoolaha, qaar dhaqda iyo kuwa ganacsadaba.

Xoolaha nooli waxay u qaybsamaan dhawr qaybood waaxana ka mid ah:

- 1) Kuwa la rabbeysto sida geela, adhiga, lo'da, dameeraha, iyo fardaha.
- 2) Debed joogta sida ugaadha oo ay ka mid yihiin deerrada, biciidka, iyo cawsha.
- 3) Dugaagga oo ay ka mid yihiin libaaxa, shabeelka, iyo haramcadka. Debed joogta cidna gooni uma laha ee waxa iska leh dalka.

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha ka dhaadhiciyo ardayda in xoolaha nooli lafdhabarta dhaqaalaha dalkeenna yihiin.
- 2) Baruhu ardayda ha u sheego in ugaadhu waxtar weyn leedahay sida hiiibkeeda oo la cuno.
- 3) Ha macneeyo baruhu ereyada soo socda: Ukun, Ugaadh, Debedjoogto, Dugaag.

4) Hawlaha Ardayda:

- 1) Baraha iyo ardaydu ha ku dedaalaan inay digaag ku dhaqaan dugsiga — hawshaasina ha socoto sannadka waxbarashada oo dhan.


5. Laylis:

- 1) Maxaa ka mid ah xoolaha nool ee la dhaqdo?
- 2) Kuwee baynu ka helnaa hilib iyo ukun caanose aan lahayn?
- 3) Kuwee baynu ka helnaa caano, hilib iyo subag intaba?
- 4) Sheeg waxtarka dameeraha iyo fardaha.
- 5) Sheeg magacyada shan nooc oo ugaadha ah?
- 6) Ugaadha yaa leh?
- 7) Sheeg saddex dugaag ah magacyadooda?
- 8) Waa maxay dugaaggu?

D H I R T A :

1. Ujeeddo:

Ujeedada casharkani waa in ardaygu ogaado in dhirtu tahay lafdhabarta nolosha.



2. Dulucda Casharka :

Dhirta waxaynu ka helnaa cunto fara badan oo kala duwan; sida galleyda, haruurka, sonkorta iyo khudradda. Sida runta ah cuntada oo dhan waxaynu ka helnaa dhirta; maxaa yeelay, xooluhu waxay daaqaan dhirta dabadeedna waxay yeeshaan caano, subag iyo hilib shilis.

Dhulku hadduusan dhir lahayn biyaha ma qabsadeen. Hadduusan biyaha qabsanna geedo kama soo baxeen oo wuu nabaad guuri lahaa wuxuuna noqon lahaa xaaluf. Haddaan dhirtu jirin nooluhu ma jireen.

Waxtarka dhirta lama koobi karo waxaana ka mid ah:

- 1) Waa la harsadaa.
- 2) Alaabta dhismaha ayaa laga sameeyaa.
- 3) Alaabta guryaha ayaa laga sameeya, sida kuraasta, miisaska, iyo sariiraha.
- 4) Warqadaha ayaa laga sameeya.
- 5) Biraha ayaa lagu daabaa.
- 6) Weelashaa laga sameeyaa sida haamaha.
- 7) Caleentooda ayey xooluhu daaqaan.
- 8) Midhahooda iyo xabagtooda ayaa dadku cunaa.
- 9) Sidaas darteed waa in dhirta la dhaqaaleeyaa oo aan la goyn.

3. Tusaale Bare :

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Nabaadguur, xaaluf, noole, naqa (doogga.)
- 2) Baruhu ardayda si faahfaahsan ha ugu sheego qaybaha dhirta, masalan dhirta waaweyn, geed-gaabka, cawska, naqa (doogga).
- 3) Baruhu ardayda si aad ah ha ugu tilmaamo xannaanaada dhirta.

4. Hawlaha Ardayda :

- 1) Baraha iyo ardaydu dhir ha ku abuureen dugsigaa. Arday waliba geed ha beero, ha waraabiyo hana ilaaliyo sannadka waxbarashada oo dhan.

Casharka Shanaad

B I Y A H A

1) Ujeeddo:

Ujeedada Casharkani waa in ardaygu ogaado kaalinta biyuhu nolosha kaga jiraan. Biyo la'aani waa nolol la'aan.

2) Dulucda Casharka.

Dadka, xoolaha iyo dhirtuba waxay u baahan yihiin biyo. Biyaha waynu cabnaa, wax baynu ku maydhannaa, waxna waa ku karsannaa.

Xoolaha iyo beeraha labadaba waxaynu ka waraabsannaa biyaha. Biyuhu waa lagama maarmaan. Biyaha waxaynu ka helnaa roobka, webiyada, ceelasha iyo badda.

Sida runta ah biyuhu waa halbowlaha nolosha maxaa yeelay marka roobku da'o dhirtu waxay ka cabtaa reyska oo waxay bixisaa doog, caleen, iyo midho.

Dalkeennu wuxuu leeyahay laba webi oo ah Jubba iyo Shabeelle iyo bad xeeb dheer leh. Biyaha baddu waa dhanaan oo lama cabbi karo, hase yeeshee, baddu waxay leedahay faa'iidooyin badan oo ay ka mid yihiin kalluunka, milixda iyo dekedaha wax laga dhoofiyo lagana soo dejiyo.

3) Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha u sheego ardayda ha kana raarido in biyuhu yeelan karaan waxyeello iyo dhibaatooyin xagga caafimaadka haddaan wasakhda laga ilaalin.
- 2) Baruhu ha u sheego ardayda in roobku yahay sababta ugu weyn ee biyaha keenta.
- 3) Baruhu ha sharxo ereyada soo socda: Waraabis, halbowle, kaalinta, reyska, dekedda, webi.

4) Laylis::

- 1) Imisa webi baa dalkeennu leeyahay?
- 2) Sheeg magacyada webiyadeenna?
- 3) Sheeg afar faa'iido oo biyuhu leeyihiin?
- 4) Sheeg laba faa'iido oo baddu leedahay?
- 5) Maxaa dhacaya haddii biyaha la wasakheeyo?

Casharka Lixaad

H A W A D A

Ujeeddo:

Ujeedada casharkani waa in ardaygu ogaado in hawadu kaalinta kowaad ee nolosha tahay - la'aanteedna wax noolaan karaa jirin.

2. Dulucda Casharka

Hawadu waa udub xoogga nolosha. Dadka, dhirta, xoolaha shimbiraha iyo noolaha kaleba waxay u baahan yihiin hawo ay neefsadaan. Hawo la'aan cidna ma noolaan karto. Hawada fiicani waxay ku jirtaa meel kasta oo furan. Aqalka, fasalka iyo dibadaha intaba waxa ka buuxa hawo fiican. Sidaa darteed, waxaynu markastaba furnaa dariishadaha (daaqadaha) si aynu hawo caafimaad u helno.

3. Tusaale Bare :

- 1) Baruhu ardayda ha faro inay had iyo goor hawada u furaan meesha ay seexdaan ama ku nool yihiin.
- 2) Baruhu ha faro ardayda marka uu seexanayo inaanu wejiga qarín oo aannu iska xidhin hawada.

4. Hawlaha Ardayda :

- 1) Baruhu ha tuso ardayda in hawadu lagama maarmaan tahay. Ardaydu sanku iyo afka ha is qabtaan oo hawada ha iska joojiyaan ilaa inta ay awoodaan.

5. Laylis :

- 1) Maxaa dhacay haddii hawada lagaa joojiyo?
- 2) Maxaynu daaqadaha fasalka iyo guryaha u furanaa?
- 3) Xaggee baan ka neefsanaa?
- 4) Dhirtu hawo ma u baahan tahay? Waayo?

C A R R

1. Ujeeddo :

Ujeedada Casharkani waa in ardaygu ogaado qiimaha carradu u leedahay nolosh dhirta iyo xoolaha.

2. Dulucda Casharka :

Dhulka oogadiisu waxay ka kooban tahay cammuud dhoo-bo iyo dhagax. Cammuda ugu fiican waxa la yiraahdaa car-ro. Carradu waxay u kala baxdaa laba qaybood — car-ro madow iyo car-ro guduud. Car-ro madowdu waxay u wanaagsan tahay beeraha, car-ro guduudduna waxay u fiican tahay daaqa.

Car-ro guduudu waa ciid cas waxayna ku badan tahay hawdka. Dhirtu waxay si fiican uga baxdaa dhulka carrada wanaagsan leh; maxaa yeelay dhirtu waxay ku nooshahay carrada biyaha, kulka qorraxda iyo hawada.

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha la kaashado casharkan iyo kuwa kale ee la mid ah baraha Cilmiga Sayniska ee fasalka kowaad.
- 2) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda : Dhulka oogadiisa, car-ro, cammuud, ciid, dhoo-bo iyo bacaad
- 3) Baruhu ha tuso ardayda hadday u suurowdo car-ro madow iyo car-ro guduudaba.

4. Laylis :


- 1) Waa maxay qaybaha carradu?
- 2) Wax ka sheeg faa'iidada carrada wanaagsan?
- 3) Carrada hawdka magaceed?
- 4) Dhulka oogadiisu maxuu ka kooban yahay?
- 5) Dhagaxu muxuu taraa?

Casharka Siddeedaad

SHIMBIRAHHA

1. Ujeeddo :

Ujeedada casharkani waa in ardaydu wax ka bartaan shim-biraha — gaar ahaan kuwa ku nool degmada ardaydu joogto.



2. Dulucda Casharka:

Xawayaanka Soomaaliya ku nool waxa ka mid ah: Shim-biraha. Shimbiruhu waxay u qaybsamaan jaadad badan oo kala

duwan, dhinaca midabka iyo xagga dhumucdaba.

Shimbiruhu guud ahaan waa baalley, hase yeeshee qaar baan duulin sida gorayada iyo digaaga. Shimbiruhu waxay cunaan miraha hase yeeshee, qaar baa ku darsada hilibka sida haadda.

Shimbiruhu waxay leeyihiin faa'iidooyin badan waxaana ka mid ah: hilib, ukun iyo baal, hase ahaate qaar baa waxyeello leh sida kuwa beeraha cuna oo ay ka mid yihiin xamarraha iyo yaryarda. Waxa jira kuwo xoolaha dhiigga ka nuuga sida hur-yada iyo baqayaha,

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha la kaashado dadka aqoonta u leh magacyada iyo dabeecada shimbiraha.
- 2) Baruhu ha u sharxo ardayda shimbiraha waxtar u leh dadka sida goroyada iyo kuwa waxyeelada u leh dadka sida dhuuryada (haad-ka-adag) iyo xamarraha.
- 3) Baruhu ha la kaashado casharkan Baraha Cilmiga Sayniska.

4. Hawlaha Ardayda:

- 1) Baruhu ardayda ha u qaybiyo laba kooxood oo midi soo wareysato shimbiraha waxtarka leh, midda kale-na kuwa waxyeelada leh. Koox kastaabana fasalka ha uga warranto.

5. LAYLIS:

- 1) Shimbiraha la dhaqdaa waa kuwee?
- 2) Sheeg laba shimbirood oo waxyeelo u leh dadka?
- 3) Sheeg laba shimirood oo waxtar dadka u leh?
- 4) Sheeg saddex shimbirood oo hilibka cuna?

Casharka Sagaalaad

CUNTADA DUKAAMADA TAAL

1. Ujeedo:


Ujeedada casharka Sagaalaad iyo casharka Tobnaad waa in ardaygu wax ka barto waxyaalaha dukaamada lagu gado.



Dukaan Cunto lagu gadayo


2. Dulucda Casharka:

Cuntadu waxay ka mid tahay tiirarka nolosha nooluhu ku



Baabuur daqiiq sida.

dhisan tahay. Cuntadu waxay u kala baxdaa qaybo badan; qaar miro ah sida bariiska, iyo qaar khudrad ah. ama oon xoolaad ah sida subagga.



Rooti

Cuntada miraha ahi waxay ka baxdaa beeraha dalkeenna ama waxa laga keena dalalka shisheeyaha - dabadeedna waxa lagu gadaa dukaamadeenna si qof waliba intuu u baahan tahay uga soo miisto (beegto).

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ardayda waa in uu wax uga sheego cuntada dukaanada taal ee aan kor lagu magacaabin sida daqiiqda iyo habeynteeda. (Daqiiqda waxa laga sameeyaa sarreenka; waxana cunto looga sameeysta siyaalo badan (rooti).
- 2) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Oon xoolaad, tiirarka nolosha, habeynta, miisto, beegto, Iwm,
- 3) Baruhu ardayda fikrad ha ka siiyo alaabta wax lagu miisto ama beegto.

4. Hawlaha Ardayda:

- 1) Baruhu ardayda kooxo ha u qaybiyo; koox walibana ha soo faaqido siyaalaha cuntada loo iibsado iyo sida rootida loo habeeyo, dabadeedna koox waliba fasalka ha uga waranto waxay soo aragtay.

5. Laylis:


- 1) Sheeg laba nooc oo daqiiqda cunto looga samaysto?
- 2) Sheeg laba shay oo dukaamada yaal oo qado laga samaysto?
- 3) Sheeg magaca alaabta bariiska ama daqiiqda marka dukaanka laga soo iibsanayo lagu beegto (qiyaaso)?
- 4) Sheeg magaca alaabta haruurka ama galleyda lagu miisto?
- 5) Subagga xaggee baynu ka helnaa; Sidee baase loo sameeyaa?

Casharka Tobnaad

CUNTADA HABEYSAN

1. Ujeeddo :

Ujeedada casharkan ka dambeysaa waa in ardaygu wax ka barto cuntada kaydsanta kadib marka la habeeyo, siyaalaha loo sameeyo, iyo waxtarkeeda.



Cunto habaysan oo qasacado ku jirta

2. Dulucada Casharka :

Casharkii hore waxaynu ku soo baranay cuntada miraha ah ee kariska u baahan, casharkanna waxaynu ku baranaynaa cuntada habaysan ee qasacdaha ku jirta iyo qaar kaleba. Cuntada habaysani weligeed ma doorsoonto (ma xumaato), haddii aan qasacadda ay ku jirto la daloolin ama la furin. Sidaas darteed wey hawl yar tahay marka la doono in la cuno. Cuntada habaysani badanaaba way bisishahay. Dadka socdaalka ah, ciidamada dagaalka ku jira, iyo qof kasta oo degdegayaaba had iyo jeer cunto habaysan bay qaataan. Cuntada habaysan waxa

ka mid ah.

- 1) Hilibka lo'da ee lagu habeeyo Wershedda hilibka ee magaalada Kismaayo ku taal.
- 2) Hilibka kalluunka ee lagu habeeyo magaaloooyinka Laas-qoray, Caluula, Xaabo, iyo Qandala.
- 3) Khudradda sideeda loo habeeyo ee ay ka mid tahay yaanyada (Tamaandhada), Maangaha, iyo Mafafayga ee lagu habeeyo Wershedda «ITOP» ee magaalada Afgooye ku taal.
- 4) Iidaanka oo ah wax allaale wixii dufan leh oo cuntada lagu darsado, ama bislaysto, waxaana ka mid ah:
 - b) Saliida oo dhawr jaad ah lagana tuujiyo ama shiido dhirta sida gabbaldayaha iyo sisinta.
 - t) Subagga oo laga bixiyo caanaha marka la lulo (sixinta) ama barruurta, dhuuxa iyo wixii la mid ah marka la shiilo.

Dukaamadeenna waxa kale oo yaal cunto habaysan, hase yeeshee, dalalka qalaad laga keeno, waxaana ka mid ah caano boodhaha, kaafiga iyo macmacaanka. Sonkortu run ahaan waxay ka mid tahay cuntada la habeeyo, sida ta Wershedda Sonkorta ee Jowhar ku taal lagu sameeyo.

3. Tusaale Bare

- 1) Baruhu casharkan waa inuu ugu yaraan laba dersi u qeybiyaa.
- 2) Baruhu ha isku dayo inuu ardayda tuse ama taabsiiyo cuntada kala duwan ee casharka lagu soo sheegay iyo siyaalaha loo sameeyo ama habeeyo.
- 3) Baruhu ardayda ha u sheego waxyaalaha kale ee la habeeyo halkanse aan lagu magacaabin sida, Buskudka, nacnaca.

- 4) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda : Gabbaldayaha, Kaydka, Bisaylka, Mafafayga, Socdaalka ,Tuujiyo, Shiilo, Qalaad, Sixinta.

4. Hawlaha Ardayda :

Baruhu ardayda kooxo ha u qaybiyo, koox waliba qayb cuntooyinkaas ka mid ah ha soo wareeysato (sida loo sameeyo). Dabadeedna fasalka ha uga warranto wixii ay soo ururisay.

5. Laylis :

- 1) Sheeg laba jaad oo hilib ah oo dalkeenna lagu habeeyo.
- 2) Sidee baa subagga sixinta loo habeeyaa?
- 3) Sheeg laba siyood oo saliidda ama subagga cuntada loogu iidaanto?
- 4) Maxay ciidamadu markay dagaalka ku jiraan u doortaan cuntada habaysan?
- 5) Xaggee bay saliiddu ka timaadaa?

Casharka Kow iyo Tobnaad

D H A R K A

1. Ujeeddo :

Casharka ujeedadiisu waa in ardaygu wax ka barto dharka dukaamadeenna yaal iyo habka kala duwan ee dadweynaha Soomaaliyeed huga u xidhaan.



2. Dluca Casharka

Dukaamadeena iyo baaadlayaashaba waxaa yaal dhar fara badan oo kala duwan; xagga midabka, qiimaha iyo qaabkaba. Dadweynuhu siyaalo kala geddisan buu dharka u xidhaa ama u gashadaa. Reer miyiga iyo reer magaalaha, ragga iyo dumarka, carruurta iyo dadka waaweyn, qolo kastaaba sida badan; waxay xidhaan dhar u gooni ah.

Ragga miyigu wuxuu qaataa laba go' oo maxamuudi ah, ama go' iyo macawis. Dumarka miyigu waxay xirtaan maro saddex qayd ah ama guntiino. Magaalada raggu badanaaba wuxuu qaataa saraawiil (surwaallo) dumarkuna toobab dirigo iyo guntiino. Geogaradaha, miyi iyo magaaloba dumarku wey ku qaataan.

Inkasta oo dharku dadka u kala soocan yahay, haddana waxa jira dhar cid kastabada gashato ama xirato; waxaana ka mid ah, macawisaha, funnaanadaha dhaxanta, shatiyada iyo garamada.

Dharku wuxuu inoo leeyahay faa'iidooyin badan, waxaana ka mid ah :

- 1) Dhaxanta oo aynu ka huwanno.
- 2) Kulka cadceeda oo uu innaga celiyo.
- 3) Cawradeenna oo aynnu ku qarsanno.

3. Tusaale Bare :

- 1) Baruhu ardayda ha ka dhaadhiciyo sababaha qaabka dharka loo qaataa u kala duwan yahay, miyiga, iyo magaalada, meselan : xagga dhaqaalaha, fuqaydka, adkaysiga iwm.
- 2) Baruhu ardayda fikrada ha ka siiyo meelaha qaabka dhar xirashada ragga iyo dumarka iskaga mid noqon karaan. Sida gabadhaha dhallinyarada ah ee iminka saraawiisha iyo shaatiyada qaata. Ama dumarka oo macawisaha googarado iyo guntiinooyin ka dhigta.
- 3) Baruhu ha macneeyo ereyada: Maxamuudi, Bacadlayaasha, Cawrada, Guntiino, Xarrago, iyo wixii kale

ee adagba.

4. **Hawlaha Ardayda :**

Baraha iyo ardayduba iyaga oo la kaashanaya baraha sawirka ha isku dayeen inay sawirraan dad dhar kala duwan xirirka iyo meelo dhar lagu gadayo ama tolayo.

5. **Laylis :**


- 1) Sheeg laba jaad oo dharka ragga miyigu xirtaan ah.
- 2) Sheeg maro dumarka miyiga iyo kuwa magaaladuba xirtaan.
- 3) Sheeg laba nooc oo dhar ah oo ragga iyo dumarkuba isticmaali karaan.
- 4) Sheeg saddex faa'iido oo dharku inoo leeyahay?

Casharka Laba iyo Tobnaad

W I C I Y A D

1. Ujeeddo :

Ujcedada Casharkan laga leeyahay waa in ardaydu wax ka barato alaabta la adeegsado ee dukaamadeenna taal, iyo ta dadka Soomaaliyeed samaystaan dirkaba.




2. Dulucda Casharka :

Dukaamadeenna, bacadlayaasha, iyo meelaha kale ee

wax lagu gadoba waxaa laga helaa alaabta wiciyadda loo yaqaan ee guriga lagaga adeegto. Alaabtaas waxaa ka mid ah :

- 1) Digsiyada, iyo qaaddooyinka, sixniyada, kirliyada madiibadaha, koobabka.
- 2) Faynuusyada, Tiriigta, iyo alaabta nalka.

Alaabtaasi dhammaanteed wax laga keenaa dalalka shi-shiyeeyaha, hase yeeshee, waxa jirta alaab fara badan oo dalkeen-na lagu sameeyo, sida dheryaha adariga loo yaqaan, haamaha dhiilaha, haruubbada Mardabaannada (ashuunnada).



Alaabta wiciyadu waa lagama maarmaan in xaas waliba in ku filan ka haysto. Soomaalidii hore, gacanteeda ayey ku samaysan jirtey alaabta adeegsiga, siiba kuwa nolosha dadka aad ula xiriirsanaan jirey sida dheriga oo dhoobo laga sameyn jirey, iyo fandhaalada oo laamaha dhirta laga qori jirey. Kuwaas oo reer miyigu ilaa haddaba isticmaalo.

3. Tusaale Bare :

- 1) Baruhu ardayda si faahfaahsan ha ugu sheego siyaalaha kala duwan ee alaabtaas loogu adeegto (Digsiga waxbaa lagu karsadaa, sixniga wax baa lagu ritaa, iwm).
- 2) Baruhu ardayda ha la socod siiyo sida weel Soomaaligii hore iyo weelka qalaad isu beddeleen (qaadadu waxay beddeshey fandhaalkii).

- 3) Baruhu ardayda wax ha ka baro dhirtii Soomaalidu weel caanoodka ka samaysan jirtey, sida qabada, mo-rohda, iwm.

4. Hawlaha Ardayda :

Baraha iyo ardaydu ha ku dedaalaaminay weel Soomaaligii hore sida dheryo, jalkado iyo wixii la mid ah dhoobo uga sameeyaan.





5. Laylis

- 1) Sheeg afar shay oo ka mid ah wiciyada guriga lagaga adeegto?
- 2) Maxaa xeeryaha iyo fandhaalada laga sameeyaa?
- 3) Sheeg laba siyood oo haamaha wax loogu qabsado.
- 4) Sheeg laba geed oo weel caanoodka laga sameeyo?
- 5) Ubbadu waa maxay, maxaase lagu qabsadaa?
- 6) Haruubka geela lagu maalo, magacii?

ALAABTA WAX LAGU QABSATO

1. Ujeeddo :

Ujeedada casharkani waa in ardaydu wax ka barato alaabta wax lagu qabsado. Sid alaabta Dugsiyada.



2. Dulucda Casharka :

Subaxdii markaad Dugsiga tegeysid, waxaad qaadataa qalin, buug, iyo masaxaad, markaad wax sawiraysana waxaad isticmaashaa qalimada midabka leh ee wax lagu sawiro. Alaabtaas oo dhan waxaad ku ridataa shandad yar oo ah kuwa alaabta lagu qaato.

Xiisadda ciyaaraha jidhka, iyo waqtiyada kale ee firaaqadaba waxaad ku ciyaartaa kubbado kala duwan. Sida kubbadda cagta, ta kolleyga, iyo ta laliska. Alaabtaas kala jaadka ah dhammaanteed waxaynu ka hellaa dukaamadeenna.

Dukaamadeenna waxa kale oo yaal alaab fara badan oo aynnu wax ku qabsanno, waxaana ka mid ah: sanduuqyada, raadyawga, saacadaha iyo shanlooyinka lagu feerto.

3. Tusaale Bare :

- 1) Baruhu ardayda ha ka dhaadhiciyo, faa'iidooyinka ciyaaraha jirku u leeyihiin iyo qiimaha weyn ee barashada sawirku leeyahay.
- 2) Baruhu ardayda ha u sheego casharrada waxtar ka ah ee dheegeysiga raadyawgu leeyahay.

4. Hawlaha Ardayda :

Ardaydu ha sameeyaan liistooyin ku saabsan alaabta dukaamada taalla ee ay ka mid yihiin kuwa casharka lagu sheegay.

5. Laylis :

- 1) Maxaad ku qaadataa alaabtaada dugsiga?
- 2) Xaggee baa laga helaa alaabta dugsiga?
- 3) Maxaynu ku fallaa sanduuqyada?
- 4) Waa maxay faa'iidooyinka ciyaaraha?
- 5) Maxaad qabataa waqti firaaqaha?

D A W A D A

1. Ujeeddo :

Ujeedada casharkani waa in ardaygu wax ka barto faa'iidoodayinka «Daawada» iyo in marka la bukoodo la is daweeyo.



Dhakhtar Wax Daweynaya

2. Dulucda Casharka :

Alaabta dukaamada lagu gado waxa ku mid ah dawada. Dawada waxaynu u baahanaa marka aynu bukoono, ama xanuun ina qabto.

Cudur kastaba wuxuu leeyahay dauwooyin u gaar ah oo loo qaato. Dawada qaar waa la liqaa, sida Asbarooga, qaarkeedna waa la isku mudaa sida Irbadaha, qaar kalena waa la cabaa. Dawada lama cuno, ama la iskuma mudo ilaa dhakhtar kuu qoro. Markaad xanuunsato waa inaad dhakhtar u tagtaa, dabadeedna dawada lagu qoro qaadataa, adiga oo talada dhakhtarka raacaya. Weeligaa iska ilaali dawo aan dhakhtar kuu qorin. Dawada waxaa gada dukaamo u gaar ah oo Farmasi loo yaqaan.

3. Tusaale Bare :

- 1) Baruhu ardayda ha ka dhaadhiciyo faa'iidooyinka is-daweyntu leedahay.
- 2) Baruhu waa inuu si weyn carruurta ugaga digaa inay dawo aan dhakhtar u qorin iska cunaan.
- 3) Baruhu ardayda (isaga oo macallinka Sayniska la kaashanaya) ha ka dhaadhiciyo siyaalaha cuddurka la isaga ilaaliyo (nadaafadda, iwm).
- 4) Baruhu ardayda wax ha uga sheego dawada xoolaha oo qudheeda laga helo dukaamo u gaar ah, iyo faa'iidooyinka caafimaadka xoolaha.

4. Laylis :

- 1) Dukaamada dawada lagu gado magacood?
- 2) Haddii xannuun ku qabto maxaad samaynaysaa?
- 3) Maxaad yeeleysaa hadaad adiga oo buka dawo meel taal aragto?
- 4) Dawada dukaamadeeda mooyaane meel kale ma laga helaa?
- 5) Nadaafadda iyo hurdadu sidee bay caafimaadka qofka wax ugu taraan?

SEYLADDA XOOLAHA NOOL

1. Ujeeddo :

Ujeedada casharkan iyo ka ku xigaaba waa in ardaydu wax ka barato seyladdaha xoolaha nool, hilibka, khudradda, iyo waxyaalaha kale ee la cunoba lagu iibiyo.

2. Dulucda Casharka :

Xoolaha nool waxa lagu gadaa suuq u gaar ah oo seylad loo yaqaan. Seyladda waxa had iyo goor jooga dad dawladda u shaqeeya oo xoolaha cashuura iyo dad ganacsato ah oo xoolaha iibsada. Waxa kale oo jooga dad xoolaha dillaala. Halkaas waxaynu ka garan karnaa in dadweyne badani xoolaha iibkooda ka faa'iideysto.



Xoolaha qaarkood waxaynu u dirnaa dalalka dibedda (sida dalalka Carabta) qaarka kalena waxa hilibkooda la keena kawaanka suuqa hilibka). Halkaas oo xaasaska iyo dadka

kaleba ka soo gataan wixii ay u baahan yihiin. Suuqa hilibka waxa kale oo lagu gadaa khudradda cuntada lagu macaaneeyo ee qudaarta loo yaqaan waxaana ka mid ah:

1. Yaanyada,
2. Basasha,
3. Baradhada.
4. Basbaaska.
5. Saladhka, iyo wixii la mid ah.

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ardayda si faahfaahsan ha uga dhaadhiciyo heerka xoolaha nooli kaga jiraan nolosha dadka Soomaaliyeed (Xoolo dhaqatada badan, ganacsatada xoolaha, hilibka, dillaalka iwm).
- 2) Baruhu waa inuu degaanka iyo dadka yaqaana la kaashadaa nolosha iyo dhiqitaanka xoolaha.
- 3) Baruhu ardayda fikrad ha ka siiyo sida xoolaha loo dhaqo iyo noloshooda (sidka geela wa imisa bilood — 13 bilood, Adhiga — 5 bilood, lo'da — 9 bilood).
- 4) Baruhu ardayda ha ka dhaacdhiyo, faa'iidooyinka hilibku jidhka dadka u leeyahay.
- 5) Baruhu ardayda ha u sheego waxyaalaha kale ee xoolaha laga helo xagga cuntada iyo ganacsigaba — sida hargaha iyo saamaha, caanaha, subagga, iwm.

4. Hawlaha Ardayga:


Baruhu ardayda kooxo ha u qaybiyo, koox walibana ha soo wareysato wax gaar ah, dabadeedna fasalka ha uga sheekayso wixii ay war soo heshay (koox qiimaha xoolaha soo warsata, koox sida xoolaha loo dhaqo — koox hilibka, iwm).

5. Laylis:

1. Yaa xoolaha nool magaalada u keena?
2. Sidee bay xaasaska magaaladu hilibaha u helaan?
3. Waa maxay dillaalku? (Ninka dillaalka ah shaqadiisa sheeg?)
4. Sheeg saddex nooc oo khudradda cuntada lagu daro ah.
5. Sheeg laba meesi oo hilibkooda la cuno hase yeesheen aan geel, adhi iyo lo' ahyn.

Casharka Lix iyo Tobnaad

SUUQA CUNTADA BEERAHA



Khudrad suuq lagu gadayo.

1. Dulucda Casharka:

Sidaad horeba u soo baratay waxaa jirta cunto beeraheena ka baxda oo suuqa lagu gado. Waxana ka mid ah: hadhuudhka, galleyda iyo digirta.

Cuntadaas waxa lagu miisaa galaan iyo kiilo, si qof waliba inta uu u baahan yahay uga qaato, hase yeeshee, mararka qaarkood galleyda waa la shiidaa.

Suuqa cuntada (seylada) waxa kale oo laga helaa khudrada sideeda loo cuno. Khudradaas waxaa ka mid ah: Muuska, Liin macaanta, Canbaha iyo Mafafayga. Cuntada magaaloyinka laga helo, waxa kale oo ka mid ah: Timirta oo dalalka dibedda inooga timaadda.

2. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ardayda ha u sheego siyaalaha kala duwan ee haruurka iyo galleyda looga samaysto canbuullo

ama garow, canjeelo, soor, mufo iwm.

- 2) Baruhu ardayda ha ka dhadhiciyo faa'iidooyinka khudraddu jidhka dadka u leedahay.
- 3) Baruhu ardayda ha u sheego wixii cunto ama khudrad ah ee aan halka lagu sheegin, sida rumaanta, canabka, iwm.

5. Hawlaha Ardayda:

- 1) Baruhu ardayda oo kooxo ah ha u diro suuqa cuntada iyo khudradda si ay u soo wareystaan, dabadeedna fasalka uga sheekeeyaan.


4. Laylis:

- 1) Sheeg laba shay oo lagu miisto cuntada.
- 2) Sheeg afar shay oo khudradda sideeda loo cuno.
- 3) Xaggee bay timirtu inooga timaadaa?
- 4) Sheeg saddex nooc oo galleyda ama haruurka cunto looga samaysto.
- 5) Wax ka sheeg faa'iidooyinka khudradda?

CUNTADA DALKEENNA LAGA SOO SAARO

1. Ujeeddo

Ujeedada casharkani waa in ardaygu wax ka ogaado cuntada ka baxda dalkeena.



2. Dulucda Casharka:

Sic'ii aynu casharradii hore ku soo qaadanay cunto badan oo kala duwan ayeynu dalkeenna ku cunaa. Cuntadaas waxa ay u qaybsan tahay laba qaybood. Qayb dalkeenna laga soo saaro iyo qayb dalalka shisheeyaha laga keeno. Cuntada dalkeenna laga helo waxa ka mid ah:

- 1) Hilib — oo aynu ka helo xoolaha sida adhiga, geela, lo'da iyo digaaga.
- 2) Kalluunka (Mallay) oo aynu badda iyo webiyada kala soo baxno. Kalluunka sida badan waxa cuna reer magaalaha.
- 3) Caanaha oo xoolaha aynu ka maallo.
- 4) Galleyda, Maseggada, digirta, iyo sarreenka oo aynu dalkeenna si aad ah uga beerro.
- 5) Muuska, Canbaha, iyo Liinta oo dalkeenna si aad ah uga baxa.
- 6) Sisinta oo aynu saliidda ka miiranno. Saliidda waxaynu ka karsanaa kuna iidaamanna cuntada.

Dadka Soomaaliyeed ee miyiga ku nool waxay cuntadoodu u badan tahay hilib, caano, galley iyo haruur.

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Iidaan, Galley, Meseggo, haruur iyo sisinta.
- 2) Baruhu ha u sharxo siyaabaha kala duwan ee galleyda iyo haruurka cunto looga sameeyo sida cambuulo, soor, furfur, muufo, laxoox, iwm.
- 3) Baruhu ha u sharxo hana u keeno ardayda hadduu karo muus, canbe, liin, iwm, haddii aan degmadiisa laga helin.

4. Hawlaha Ardayda:

Ardayda iyo baruhu beer yar oo khudrad ah dugsiga ha ka sameeyaan (Basal, Tamaandho, iwm). Hawshaasina ha socoto sannadka waxbarashada oo dhan.

5. Laylis:




- 1) Sheeg laba shay oo cunta ah oo degmadaada ka baxa.
- 2) Sisinta maxaynu ku qabsannaa?
- 3) Cuntada ugu badan ee aynu dalalka shisheeyaha u dhoofinnaa waa maxay?
- 4) Sheeg saddex siyood oo cunto looga sameeyo haruurka ama galleyda?
- 5) Wershadda hilibka iyo ta caanaha halkay ku kala yaalaan.

Casharka Siddeed iyo Tobnaad

**WAXA LA CABBO EE
DALKEENNA LAGA HELO**

1. Ujeeddo:

Ujeeddada casharkani waa in ardayga ogaado in waxa la cabbaa ka mid yihiin cuntada.



2. Dulucda Casharka:

Waxyaalaha Soomaalidu cabto waxa ugu badan caanaha iyo biyaha. Caanaha waxaynu ka maalnaa xoolaha. Biyaha dad-

ka iyo xooluhu cabbaan waa biyaha roobka, webiyada, ceelasha iyo berkadaha.

Nolosha dadka iyo xooluhu kama maarmaan biyaha. Haddii biyo la waayo dadka iyo xooluhuba ma noolaan karaan Beeruhuna ma baxayaan. Waxaynu oran karnaa biyo la'aani waa nolol la'aan.

Waxyaalaha kale ee Soomaalidu cabto ee dalkeenna lagu sameeyo waxa ka mid ah:

1. Faantada, Koko-Koolaha iyo Isbaraaytka oo lagu habeeyo wershedda Koko-Koolaha ee Xamar ku taal.
2. Miidda canbaha, babaayga, tamaandhada, liinta iyo waxyaalo kaleba oo lagu habeeyo wershedda habeynta khudradda ee «ITOP» ee ku taal Afgooye.
3. Shaaha oo aad loogu cabbo dalka Soomaaliyeed miyi iyo magaalaba, Sonkorta lagu daro waxa lagu habeeyaa wershadda sonkorta ee Jowhar.

Waxyaalo badan oo la cuno ama la cabbo ayaa dibedda inooga yimaada waxaana ka mid ah: Bariiska, Baastada, Timirta, Burka iyo Caano booraha.

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha kala caddeeyo canbaha iyo babaayga (Mafafay).
- 2) Liinta, Tamaandhada, Canbaha, Babaayga iyo wixii la mid ah oo dhan ha u sharxo ardayda haddii aan degmadiisa laga helin.
- 3) Faantada, Isbaraytka, Koko Koolaha iyo wixii la mid ah oo dhan ha u sharxo ardayda haddii aan degmadiisa laga helin.

4. Laylis:

- 1) Maxaad ugu jeceshahay waxaad cabto? Waayo?
- 2) Dadka magaalada wuxuu cabbo maxaa ugu badan?
- 3) Dadka reer miyigu waxay cabbaan maxaa ugu badan?
- 4) Sheeg saddex shay oo wershadda khudradda lagu habeeyo?
- 5) Sonkorta halkee baa lagu habeeyaa?

Casharka Sagaal iyo Tobnaad

H U G A

1. Ujeedo:

Ujeedada casharkan waa inuu ardaygu ogaado in dharka aynu xidhano badidiisu dibedda ka yimaado iyo inuu barto dalkeenna kuwa lagu sameeyo.



2. Dulucda Casharka:

Dharka Soomaalidu xirataa siduu u badan yahay dibedda ayuu ka yimaadaa, hase yeeshee, waxa jira dhar dalkeenna lagu sameeyo sida ka wershadda Balcad sameeyso iyo ka Banaadiriga loo yaqaano ee lagu sameeyo Xamar, Marka iyo Baraawe.

Dharka wershadda Balcad sameeyso waxa ka mid ah dharka Dugsiyada, Guulwadayaasha iyo reer miyiga (Maxamudidida iyo Mareeykaanta). Dharka Banaadiriga ah waxa ka mid ah macawiso, Guntiinooyin iyo go'yaal adag.

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ha faahfaahiyo hana u sheego ardayda dharka badan ee kala duduwan ee Balcad lagu sameeyo sida dharka daahyada, goglaha, iwm., iyo in dharka dalkeenna lagu sameeyo badidiisu ka soo baxo wershadda dharka ee Balcad.

- 2) Baruhu ha baro ardayda meelaha cudbigu wershada uga yimaado.
- 3) Baruhu ha sharxo «Alindiga» oo ah qalabka lagu sameeyo dharka loo yaqaanno «Banaadiriga» ee lagu sameeyo dalkeenna.
- 4) Baruhu ha tuso ardayda dharka dumarkeennu gacanta ku sameeyaan sida funaanadaha, koofiyadaha, iwm.

4. Hawlaha Ardayda:

Baraha iyo ardaydu ha isku dayaan in ay soo ururiyaan qurubyo (harqado) yaryar oo dharka kala duduwan ee Balcad ah, hana ku dhejiyaan boodhka fasalka ama mid u gaar ah.


5. Laylis:

- 1) Dharka dugsiga aad ku timaadid halkee lagu sameeyaa?
- 2) Dharka reer miyigu xirtaan muxuu u badan yahay?
- 3) Sheeg afar wax oo laga sameeyo dharka Balcad?
- 4) Waa maxay Alindigu?
- 5) Sheeg laba shay oo ka mid ah dharka Banaadiriga ah?
- 6) Sheeg laba magaalo oo lagu sameeyo dharka Banaadiriga ah?

G U R Y A H A

1. Ujeeddo:

Ujeedada casharkani waa in ardaygu barto noocyada guryaheenna iyo waxyaalaha laga sameeyo.



2. Dulucda Casharka:

Dadku meel kasta oo uu ku nool yahay wuxuu u baahan yahay hooy. Hooyga dadku waa kala duwan yahay. Dalka Soomaaliyeed guryaha la galo waxa ka mid ah:

1. Aqal Soomaali oo ka sameysan caws, mayrax, saamo, qoryo, caw iyo xarko.
2. Mudul oo ka sameysan qoryo, sarab iyo dhoobo.

3. Cariish (dergad) oo ka sameysan qoryo, sarab, iyo dhoobo.
4. Sar (Daar) oo ka sameysan dhagax, dhoobo, nuurad, sibir, alwaax, iyo jiingad.

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ardayda waa inuu u sharxaa in kala duwanaanta guryuhu la xiriirto dhaqaalaha iyo degaanka, sida reer guuraagu u dhistaan guri la rari karo ayaa qofka deganina u distaa saro waaweyn.
- 2) Baruhu noocyada guryaha ee aan kor lagu sheegin, ardayda ha baro sida barakada ama sandaqadaha, iwm.
- 3) Baruhu ardayda ha tuso noocyada guryaha ka dhisan degmada dugsigu ku yaal.
- 4) Baruhu ardayda ha u macneeyo ereyada soo socda: Mudul, Cariish, Caw, Sarab, Sar, iwm.
- 5) Baruhu ha tuso ardayda guryo kala duwan oo la dhisaayo.

4. Hawlaha Ardayga:

Ardaydu ha sawireen guryo kala duwan.



5. Laylis:

- 1) Sheeg saddex nooc oo guryaha degmadaada ku yaal ah?
- 2) Gurigiinu waa nooc ma?
- 3) Aqalada reer miyiga maxaa laga sameeyaa?
- 4) Dugsigaagu muxuu ka sameysan yahay?

GURYAHA MAGAALADA

1. Ujeeddo:

Casharkan waxa looga dan leeyahay in ardaygu ogaado in guryaha magaalooyinka laga dhiso siyaalo badan oo kala duwan looga faa'iideysto.




2. Dulucda Casharka:

Guryaha magaalada in loo hooydo oo keliya loo ma disto ee waxyaalo badan oo dadweynaha faa'iidooyin u leh baa lagu qabtaa, sida:

1. Qololka kaydinta cuntada iyo alaabta kaleba.
2. Dugsiyada wax lagu barto.

3. Isbitaalada dadka lagu daweeyo.
4. Xafiisyada shaqooyinka kala duwan lagu qabto.
5. Dukaanada dharka, cuntada, iyo waxyaalaha kaleba lagu gado.
6. Masaajidada lagu tukado.
7. Taalooyinka xusuusta loo dhisay.
8. Guryaha loo hooydo.
9. Golayaasha Hanuuninta Dadweynaha.



Taalada Daljiraha Dahsoon.

3. Tusaale Bare:

- 1) Baruhu ardayda ha u sheego ujeedada dhismaha taa-

- looyinka laga leeyahay.
- 2) Baruhu ardayda ha u sheego in aan xafiisyadu kuwa dawladda oo keliya ahayn.
 - 3) Baruhu ardayda ha baro hana u sawiro taalooyinka: Dhagaxtuur, Xaawo Taako, Daljirka Dahsoon iyo Sayid Maxamed Cabdulle Xasan.
 - 4) Baruhu ha macneeyo ereyada soo socda: Kaydka, Hanuuninta, Taalo, iwm.
 - 5) Baruhu ha uga sheekeeyo ardayda taariikhda Sayid Maxamed Cabdulle Xasan iyo Xaawo Taako.

4. Hawlaha Ardayda:

Baruhu ardayda kooxo ha u qaybsho. Koox kastaba ha u diro in ay raadiyaan ama soo sawiraan taalooyinka magaaladiisa ama degmadiisa ku yaal.

5. Laylis:

- 1) Taalooyinka maxaa loo dhisaa?
- 2) Sheeg magacyada laba taalo?
- 3) Maxaa lagu qabtaa golaha hanuuninta dadweynaha?
- 4) Wax ka sheeg isbitaalka waxtarkiisa?